



PORLAND PUBLIC SCHOOLS

# DIB U CUSBOONEYSIINTA MAALGALINTA DEYNTA 2020

## Dulmarka Guud ee Doorashooyinka Maalgalinta La Soo Jeediyeey

Agaasinka Golaha Waxbarashada PPS waxa ay soo jeediyeen saddex qaybood oo la kala dooranayo dib u cusbooneysiinta maalgalinta daynta 2020 heerka qiimaha cashuurta waqtigan, iyaga oo ka raadinaya bulshada inay ku soo biiriyaan sida ay u arkaan qaybahani la kala dooranayo ilaa bisha Luulyo 3deeda. Haddii ay codbixiyaashu ansixiyaan, Dib U Cusbooneysiinta Maalgalinta Daynta 2020 waxa ay ahaan doontaa heerka qiimaha cashuurta hadda waxaana la sii wadi doonaa sidii loo maalgalin lahaa iskuuladeena.

Kala doorashadani la soo jeediyeey waa tusaalayaal maalgalinta goluhu u gudbinayo codbixiyaasha bisha Noofember sanaduuqda doorashada. Goluhu wuxuu gudbin doonaa mid ka mid ah qaybaha la kala dooranayo, ama wax ka bedel ku samayn ku salaysan marka la eego ray'iga bulshada ku soo kordhiyeen.

Wixii macluumaad dheeraad ah iyo aasaaska maalgalinta la soo jeediyeey ee qeybahani la kala dooranayo waxaa laga heli karaa halkan, iyo Shabakada Dib U Cusbooneysiinta Maalgalinta Daynta ee 2020 Dugsiyada Dadweynaha Portland: [www.pps.net/2020bondrenewal](http://www.pps.net/2020bondrenewal).

## La Wadaag Jawaabcelintaada Dib U Cusbooneysiinta Maalgalinta Daynta 2020

**Muxuu yahay waxa ay Agaasiinka Golaha PPS ay tixgaliyaan marka ay go'aaminayaan dib u cusbooneysiinta Maalgalinta loo gudbinayo codbixiyaasha doorashada sanduuqa Noofember?**

### Dariiqooyinka lagu bixiyo jawaabcelinta:

- Ka qeybqaado sahanka Dib U Cusbooneysiinta Maalgalinta Iskuulada 2020 bisha Luulyo 3deeda
- Kaqaybqaado Munaasabadda Onlaynka ah ee Cusboonaysiinta Curaarta Dugsiga 2020 ee qabsoomaysa 25 Juun
- Jawaabcelintaada ku soo dir Email-kani: [schoolbond@pps.net](mailto:schoolbond@pps.net)

Dugsiyada Dadweynaha Portland waxa ay ururinayaan jawaabcelinta bulshada iyada oo loo sii marayo kooxda diirada ku haysa bulshooyinka aan helin addeegyadii ay u baahnaayeen inay helaan, iyo wakiilada codbixiyaasha.

Wada hadalada golaha ee jawaabcelinta bulshada waa horaanta bisha Luulyo, soo jeedinta kama dambeysta ah ee maalgalinta la kala dooranayo waxaa la daabici doonaa faalooyinka dadweynaha. Codeynta golaha sidii ay ugu gudbin lahaayeen maalgalinta la cusbooneysiyyey codbixiyaasha sida la sii qorsheeyey bisha Luulyo 28keeda, 2020.



**Doorashada 1aad waxay noqon doontaa dib u cusbooneysiinta heerka maalgalinta daynta hadda, qorshaha ah in codbixiyaasha lagu celiyo sidii mid kale loo cusbooneysiin lahaa heer la mid ah qimaha 2022. Kani hadda la soo jeediyey, Doorashada 1aad waxaa ka mid ah maalgalinta soo socota:**

## Maalgalinta Waxbarashada La Soo Jeediyey

- In lagu kharash gareeyo \$127.5 malyuun teknoolaji loo wada siman yahay, oo ay ka mid yihiin in la bedelo kumbuyuutarada dhabta ardayda ee Chromebook iyo dib u cusbooneysiinta kaabayaasha teknoolijiga PPS
- In lagu maalgaliyo \$24.9 malyuun qabatin dhammeystiran oo dhaqan ahaan la jaanqadaya iyo agabka casharada dhammaan maadooyinka muhimka ah, oo ay ka mid yihiin luqada ingiriiska iyo xisaabta- iyada oo maalgalinteeda la yareeyey- maadooyinka ay ka mid yihiin, sayniska, farsahaxanka iyo barashada shucuurta bulshada
- In lagu maalgaliyo \$4.5 malyuun sidii loo iibsan lahaa saabanka fasalada waxbarashada gaarka, sidii yareyn laha, fasaladuna u noqon lahaayeen meelo loogu talogalay waxbarashada

## Maalgalinta Nabadvelyada & Caafimaadka La Soo Jeediyey

- In dib loogu hagaajiy \$53 malyuun ama lagu bedelo saqafyada biyaha siidaynaya ama iskuulada saqafyadoodu ay tayadoodu hoos u dhacday ilaa 9 goobood.
- In lagu bedelo \$45 malyuun ama ugu yaraan dib loogu hagaajiy qeybaha farsamada- oo ay ka mid yihiin kulaylka iyo qaboojiyaha dhismayaasha- iyada oo maalgalin dheeraad ah loo diyaariyo mashaariicda farsamada ee yaryar
- In kor loogu qaado \$26.5 malyuun dhammaan qufulada albaabada fasalada si loo gaarsiyo heerka hadda ee degmada, in lagu rakibo kamaradaha nabadvelyada, iyo in kor loogu qaado qalabka digniinta bixiya marka qof sharci daro ku soo galoo iskuulada oo aan la cusbooneysiin.
- \$15 malyuun oo lagu kordhiyo 3 iskuul ee ugu yar Magaalada Portland ee aan la xoojin dhismayaasha lagu xoojinayo lana garab wado in la bedelo saqafyadu sida ay u dhan yihiin.
- \$11 malyuun maalgalinta daynta sida loo qaado caqabadaha iyo lana sameeyo mid iskuulada K-5 ah, iyo hal dugsi sarre degmadiiba oo dhammaan deeganada la wada heli karo.

## DOORASHADA 1: \$584 MALYUUN

<b>Horumarinta Waxbarashada:</b>	<b>\$156.9M</b>
Teknoolijiga	127.5M
Manhajka	24.9M
Fasalada Waxbarashada Gaarka ah	4.5M
<b>Mashaariicda Nabadvelyada &amp; Caafimaadka</b>	<b>\$150.5M</b>
Saqafyada	53M
Farsamada kala duwan	45M
Nabadvelyada	26.5M
Ka hortaga dhulgariirka qalabkiisa	15M
Naafadu si fudu u gali karaan( ADA) dhismayaasha	11M
<b>Dib u Dhiska &amp; Dib U Cusbooneysiinta:</b>	<b>\$200M</b>
Dugsiga Sare Farsamada Benson Dhammystirkisa	138M
Dhismaha cusub ee MPG	62M
Maareynta (5%):	25.3M
Ku Talogalka Mashruuca(10%):	50.7M

## Dib U Dhiska & Soo Jeedinta Dib U Cusbooneysiinta

- \$138 malyuun oo lagu maalgalinayo dhammeystirkira dib u cusbooneysiinta Dugsiga Sarre ee Farsamada Gacanta Benson- dhismaha taariikhiga ah wuxuu kharashkiisu ku kici doonaa in dib loo cusbooneysiyo marka dhismihiisii asalka ahaa la qiyasay maalgalintii daynta sanadkii 2017.
- \$62 malyuun oo lagu maalgaliyo sidii looga dhisi lahaa dhismaha Benson dhismayaal mashaariic dhower dariiqo looga qalin jabiyo oo cusub, in qayb laga siiyo lagu taageerayo kala duwanaanshaha iyo mashaariicda lagu taageero ardayda baahiyaha gaarka ah leh Alliance ku yaal Benson iyo Meek, DART/Clinton, Xannaanada Waalidiinta Da'da yar, iyo Barnaamijka iyo Addeegyada Ardayda Iskuulada ka tagto dib loogu soo celinayo waxbarashada.

Marka la eego taasi la eego, shaqada lagu cusbooneysiinayo ama dib loogu dhisayo Dugsiyada Sarre ee Cleveland, Jefferson, iyo Wilson waxa la hakin doonaa ilaa 2022. Tani waxa ay dib u dhigi kartaa dhammeystirkira Dugsiga Sarre ee Jefferson, laakiin lagama yaabo in ay raad weyn ku yeelato Dugsiyada Sarre ee Cleveland iyo Wilson oo waa la dhammeystiri karaa.

Codbixiyaasha waxaa la weydiisan in ay ansixiyaan maalgalinta qorsheynta dhammeystiran, naqshadeyn, iyo dhismaha qaar ama dhammaan inta ka hadhsan dugsiyada sarre maalgalinta la cusbooneysiinayo ee dambe sida ugu dhakhsa badan 2022.

**Doorashada 2aad waxa ay dib u cusbooneysiin qiimaha maalgalinta hadda, iyada oo qorshaha lagu celinayo codbixiyaasha dib u cusbooneysiin kale oo wadata heer la mid ah 2022 ama 2024. Sida hadda la soo jeediye, Doorashada 2aad maalgalinta ka mid noqoneysa waxaa ka mid ah:**

## Maalgalinta La Soo Jeediye, Waxbarashada

- \$127.5 malyuun oo lagu siinayo teknoolaji loo siman yahay oo ay ka mid tahay la bedelo tablets-ka ama kumbuyuutarada dhabta (Chromebooks)la saaro ee ardayda, iyada oo la cusbooneysiinayo agabka teknoolajiga PPS
- \$29.2 malyuun la qabatimo mid guud, dhaqan ahaan la jaanqadaya dhammaan casharada waxbarashada ee waqtigan ardaydu qaadato oo ay ka mid yihiin, luqada Ingiriiska/cilmiga bulshada, xisaabta, sayniska, barashada shucuurta bulshada. Maalgalintani waxa ay ardayda siin doontaa waxbarasho tay'adeedu sareyso ku salaysan agabka waxbarashada una ogolaan doonta Oregon in buugta wax laga barto la soo celin karo.
- \$22.3 malyuun lagu horumariyo iyada oo la cusbooneysiinayo in ka badan 82 fasal oo waxbarashada gaarka ah ee degmada lana siinayo dabacsanaan aan la qalin daarin ardayda, qalabka hoos u dhigo dhawaqa lagu taageero ardayda baahida u qaba waxbarashadooda looga baahan yahay.
- \$10 malyuun maalgalin dabacsam oo wax lagaga qabanayo maalgalinta dhismayaal dheeraad ah iyo meela Aadka u baahan in wax looga qabto, oo ay ka mid yihiin iskuulada u baahan in lagu kordhiyo goobaha jimsiga jidhka, garoomada bannaanka ee lagu ciyaaro iyo goobo lagu soo bandhigo farshaxanka muuqaalka ah.

## Maalgalinta Nabadgelyada & Soo Jeedinta Caafimaadka

- \$71 malyuun oo lagu hagaajiyo ama lagu bedelo saqafyada biyaha siidaynaya ama tay'adoodu ay sii xumaanayso oo gaadhaya ilaa 12 goobood.
- \$75 malyuun lagu bedelo ama lagu hagaajiyo ugu yaraan 15 ka ugu mudan wax laga qabto qalabka farsamada- sida kulaylka iyo qaboojiyaasha dhismaha- iyada oo maalgalin dheeraad ah loo diyaarinayo mashruucyada farsamada ee yar yar
- \$26.5 malyuun kor loogu qaado dhammaan qufulada farsamada ee heerka degmada hadda, lagu rakibo kamarooyinka nabadgelyada lagu ilaaliyo, iyo in kor loo qaado ama la bedelo qalabka digniinta bixiya ee marka qof aan sharci daro ku soo galo iskuulada dhawaaqa oo aan la cusbooneysiin.
- \$15 malyuun oo lagu dhisayo iskuulada yar yar ee Magaalada Portland lagu xoojinayo xogta seesaaskooda lana bedelo isla hal mar saqafyadooda.
- \$11 malyuun caqabadaha lagaga qaado sidii ihal iskuul oo ka mid ah skuulada K-5, mid dugsiga dhewe iyo mid dugsiga sarre ay u noqon lahaayeen kuwa ay ardayda naafada ahi si dhib yar u soo galaan ugana baxaan.
- \$10 malyuun oo maalgalin dabacsan oo wax lagaga qabanayo mashruucyada muhiimka ah ee lagu horumarinayo caafimaadka iyo nabadgelyada, sida habka tuubooyinka biyaha, habka korontada, asbestos ka iyo ka hortago xaalufka degaanka, horumarinta tamarta, bedelaada sagxada dhulka, hagaajinta qalabka lagu ciyaaro ama shaqada seeska.

## DOORASHADA 2: \$785 MALLYUUN

Horumarinta Waxbarashada:	\$189.0M
Teknoolajiga	127.5M
Manhajka	29.2M
Fasalada Waxbarashada Gaarka	22.3M
Hormarinta Kalr	10M
Mashaariicda Nabadgelyada & Caafimaadka	\$208.5M
Saqafyada	71M
Farsamada Kala Duwan	75M
Nabadgelyada	26.5M
Ka hortaga dhulgariirka qalabkiisa	15M
Naafadu si fudud u geli karaan(ADA)	11M
Horumarinta Kale	10M
Dib u Dhiska & Dib U Cusbooneysiinta:	\$285M
Dhammeystirkha Dugsiga Farsamada Benson	138M
Dhismaha cusub ee MPG	62M
3 Dugsi Sarre Naqshadeyn/Dhismaha Hore	75M
Horumarinta Kalre	10M
Maareynta (5%):	34.1M
Ku Talogalka Mashruuca (10%):	68.3M

## Dib u Dhiska & Soo Jeedinta Dib U Cusbooneysiinta

- \$138 malyuun in lagu dhammeystiro dib u cusbooneysiinta Dugsiga Farsamada Gacanta Benson, dhismaha taariikhiga oo kharashgareyn doono in ka mid dib u cusbooneysiinta waxa markii hore la qiimeeyey maalgalintii sanadkii 2017
- \$62 malyuun oo lagu dhisayo dhismayaal cusub oo Benson laga dhisayo qeybta qalinqabinta leh dariiqooyin kala gedisan, kuwaasi oo taageeraya ardayda kala gedisan iyo barnaamijyada ardayda leh baahiyaha gaarka ah ee Alliance ku yaala Benson, iyo Meek, DART/Clinton, Xannaanada Waalidiinta Da'da yar, iyo barnaamijyada addeegyada ardayda iskuulada ka tegta iyaga oo dhammeyn.
- \$75 malyuun oo nashaqadeyn degdeg ah iyo qorsheynta dhismaha hore ee cusbooneysiinta Dugsiyada Sarre ee Cleveland, Jefferson iyo Wilson.
- \$10 malyuun oo maalgalin dabacsan oo wax lagaga qabanayo mustaqbalka muga ama baahiyaha diiwaangalinta ardayda ama in iskuulada la isku daro qaarkood.

Marka la eego xaalandani, \$75 malyuun waxaa lagu maalgalin karaa nashaqadeynta iyo dhisida dhismaha hore ee Dugsiyada Sarre Cleveland, Jefferson iyo Wilson Codbixiyaasha waxaa la weydiisan inay ansixiyaan maalgalinta dhismuhu inuu bilaabmo 2022 ama 2024, iyada oo dhammeystirkha iskuulada sarre ee Cleveland, Jefferson iyo Wilson dib u cusbooneysiintoodu tubtoodii haysato.

**Doorashada 3aad waxa ay noqon doontaa dib u cusbooneysiinta maalgalinta daynta hadda qiimaheeda, iyada oo qorshuhu yahay in codbixiyaasha lagu celiyo dib cusbooneysiin kale oo ay qiiimaha la mid yahay 2022 ama 2024. Sida hadda la soo jeediyey, Doorashada 2aad waxa ku jira maalgalinta soo socota:**

### **Maalgalinta Soo Jeedinta Waxbarashada**

- \$127.5 malyuun lagu siinayo teknoolaji loo siman yahay sida loo wada helayo, oo ay ka mid yihiin tablets-ka ama kumbuyuutarada dhabta la saaro(Chromebook) ardayda iyada oo la cusbooneysiinayo agabka teknoolajiga PPS
- \$29.2 malyuun oo qaban dhammeystiran, dhaqan ahaana waafaqsan casharada ardayda la siinayo ee hadda dhammaan iskuulada degmada oo ay ka mid yihiin, luqada Ingiriiska/Cilmiga bulshada, xisaabta, sayniska iyo barashada shucuurta bulshada. Maalgalintani waxa ay ardayda siin doontaa waxbarasho tay'adeedu aad u sarayso kuna salaysan agab waxbarasho oo u ogolaanayo in buugta casharada Oregon loo soo celiyo.
- \$4.5 malyuun in maalgalin lagul soo iibyo iyaga oo lagu rakibayo fasilada ardayda waxbarashada gaarka ah loona abuurayo goobo ay waxbarashadooda ku qaataan oo ka mid fasilada gudahooda ah

### **Maalgalinta Nabadvelyada & Soo Jeedinta Caafimaadka**

- \$71 malyuun oo lagu hagaajinayo ama lagu bedelo ama kuwa tay'adoodu hoos u dhacday saqafyada iskuulada ka kooban ilaa 12 goobood.
- \$75 malyuun oo lagu bedelayo ama lagu hagaajinayo ugu yaraan 15 goobood habka farsamada oo la siyo mudnaan gaar in wax lagaga qabto sida kulaylka iyo qaboojiyaasha dhismayaasha iyada oo maalgaalin dheeraad ah loo diyaarinayo mashruucyada yaryar ee farsamada.
- \$26.5 malyuun kor loogu qaado qfulada fasilada ee dugsiyada degmada hadda heerkooda, lagu rakibo kamaradaha dheeraad ah oo lagu ilaaliyo nabadvelyada iskuulada iyo in kor loo qaado qalabka digniinta bixiya marka iskuulada ay soo galaan dad aan sharci u haysan inay soo galaan oo iskuulada badankooda aan la cusbooneysiin.
- \$15 malyuun oo lagu dhiso ugu yaraan ilaa 3 iskuul oo yaryar ee Magaalada Portland waxna lagaga qabto Xogta Seesaska aan la xoojin iyada oo wax lagala qabanayo isku hal mar in la bedelao saqafyadooda dhammadtood.
- \$11 malyuun oo lagaga qaadayo caqabadaha sidii ay u fududaan lahayd in la galikaro ama ay ardayda naafada ahi ka bixi karaan hal iskuul oo K-5 ah, hal iskuul oo dugsi dhexe ah iyo hal iskuul oo Dugsi Sare ah oo ka tirsan dugsiyada degmada dhammadtood.

### **Dib u Dhiska & Dib u Cusbooneysiinta La Soo Jeediyey**

- \$138 malyuun oo lagu dhammeystirayo dib u cusbooneysiinta Dugsiga Sarre ee Farsamada Gacanta Benson- dhismaha taariikhiga ahi waxa uu kharash gareynayaa in ka badan haddii dib loo cusbooneysiyo markii la qiyasay maalgalintii sanadkii 2017.
- \$62 malyuun oo lagu dhiso dhismayaal ku dhexyaal Benson oo loogu talogalay barnaamijaya Dariiqooyin kala gedisan oo ay ardaydu u qalin-jabin karaan, iyada oo la siinayo ardayda kala duwan goob lagu taageero barnaamijka ardayda baahiyaha gaarka ah leh sida Alliance ku yaal Benson, iyo Meek, DART/Clinton,

### **DOORASHADA 3: \$1 BILYAN**

<b>Horumarinta Waxbarashada:</b>	<b>\$161.2M</b>
Teknoolajiga	127.5M
Manhajka	29.2M
Fasalada Waxbarashada Gaarka	4.5M
<b>Mashaariicda Nabadvelyada &amp; Caafimaadka</b>	<b>\$198.5M</b>
Saqafyada	71M
Farsamada	75M
Nabadvelyada	26.5M
Qalabka dhulgariirka lagaga hortago	15M
Naafadu si fudud u gali karaan(ADA)	11M
<b>Dib u Dhiska &amp; Dib u Cusbooneysiinta:</b>	<b>\$560M</b>
Dhammeystirka Dugsiga Farsamada Benson	138M
Dhismaha cusub ee MPG	62M
Cusbooneysiinta Dugsiga Sarre Jefferson	320M
Nashaqadeynta/Dhismaha hore ee 2 Dugsi Sarre	40M
Maareynta (5%):	43.6M
Ku Talogalka Mashruuca (10%):	87.2M

Xannaanada Waalidinta Da'da yar iyo Barnaamijka Addeegyada ardayda iskuulada dhexda kaga tagta.

- \$320 malyuun waxaa lagu cusbooneysiin Dugsiga Sarre ee Jefferson isaga oo la jaanqaadaya nuxurka nashaqada guud ee dhawaan la soo saaray.
- \$40 malyuun naqshad degdeg ah iyo qorsheynta dhismaha hore ee dib u cusbooneysinta Dugsiyada Sarre ee Cleveland, Jefferson iyo Wilson.

Dugsiga Sarre ee Jefferson wuxuu kaalinta koowaad kaga jiray marka la garab dhigo dugsiyada sarre ee kale labo ka mid ah saddexda yeeshay in dib loo cusbooneysiyo markii dugsiyada sarre mudhaanta la kala siinayo kuwa u baahan in wax laga qabto sanadkii 2014. Sanadkii 2014, kooxdii tallo-bixiyaashu waxa ay ku taliyeen in dib loo dhigo dib u cusbooneysiinta Dugsiga Sarre ee Jefferson ilaa 2020 si loogu helo waqtii dheeraad ah inta laga abuurayo Kulliyada Dhexe cusub ee doorashada ikhriyaariga ah ka hor inta aan la qorsheynta dhismaha cusub.

Marka la eego xaalandani 2020, \$320 malyuun waxa ay maalgalin kartaa nashaqadeynta, qorsheynta dhismaha hore iyo dhismaha Dugsiga Sarre ee Jefferson oo la jaanqaadaya qorshaha dhawaan la sameeyey ee guud oo dugsiyada tirada ardaydiisu tahay 1,750 arday.

\$40 malyuun oo dheeraad ah waxay maalgalin nashaqadeynta iyo dhismaha hore ee Dugsiyada Sarre ee Cleveland iyo Wilson.

Codbixiyaasha waxaa la weydiisan in ay ansixiyaan mashruuca dhismuhu inuu bilaabmo 2020 ama 2024 iskuulada Cleveland iyo Wilson iyaga oo haya tubta dib u cusbooneysiinta labada Dugsi Sare.